


SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADA
(VETAGRO AFRIKA LTD)



2022



1

UJEEDO:- DHISID COMPANY DAAWO VET AGRO AFRIKA LTD

Maanta oo ay taariikhdu tahay **16/04/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

1-ABDULKADIR ABDI MOHAMED, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport No.P00608451 . Ahna Gudoomiyaha Shirkada

2- ABDIRAHMAN ADAM YAROW, Somali ah, Degan Muqdisho Lehna Somali Passport No.P00783034. Anha Gudoomiye Kuxigenka Shirkada

3-SAUDI MUSSA HUSSEN, Somali ah, Degan Muqdisho Lehna Somali Passport No P00680345. Ahna Xubin katirsan Shirkada.

4- MOHAMOUD JAMA MOHAMED, Somali ah, Degan Muqdisho Lehna Somali Passport No P00518208. Ahna Xubin katirsan Shirkada.

5-ABDIKANI MOALIN QORANE , Somali ah, Degan Muqdisho Lehna Somali Passport No P00919299. Ahna Xubin katirsan Shirkada.

6-ABDULLAHI MOHAMED ABDI, Somali ah, Degan Muqdisho Lehna Somali Passport No P00608081. Ahna Xoghayaha Shirkada.

Mudanayaasha kor ku xusan iyaga oo caafimaad qaba, caqligoodunu taam yahay, cid heshiis kaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxey i weediisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

**MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA
MAGACA SHIRKADDA VETAGRO AFRIKA LTD.**



QODOBKA 2-AAD
WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA

Shirkadda **VETAGRO AFRIKA LTD**, waxaa la aas'aasay 27-FEB-2021, waxaana lagu aas'aasay magaalada Muqdisho ee caasimadda soomaaliya sida ku cad warqada shati No.SVDPO6W.kana soo baxday Wasaarada Ganacsiga Iyo Warshadaha Ee D.F.Somalia.

QODOBKA 3-AAD
XARUNTA SHIRKADDA

Xarunta Shirkadda **VETAGRO AFRIKA LTD**, waa magaalada Muqdisho Ee caasimadda Soomaaliya, waxayna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kartaa dhammaan dalka gudahiisa iyo dibaddiisaba.

QODOBKA 5-AAD
NOOCA SHIRKADDA.

- Shirkaddani waa shirkad saamiley xadidan (Private Liability Company) haddaba saamile kaste waxuu mas'uul ka yahay hatidiisa ku jirto shirkadda inta ay dhantahay.

QODOBKA 6-AAD
UJEEEDADA SHIRKADDA

Ujeeddada Shirkaddu Waa:

- Sodajinta dawada xolaha iyo Agabka beeraha
- Gudashada Howl kasta oo la xiriirta maalgelinta dalka.
- Abuuridda dakhli Cusub oo wax looga qabanayo shaqa la'aanta dalka ku baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta la xiriirta iyo hormarinta dalka
- Keenida Farsamo Cusub oo ku haboon duruufaha dalka.
- In ay qayb wayn ka qaadato dhisidda dhaqaalaha iyo horumarka bulshada Somaliyeed
- In ay abuurto ila dhaqaale iyo adeegyo ay ka faa'idaystaan Bulshada qeybaheeda kala duwan.

QODOBKA 7-AAD


RA'SUMAALKA SHIRKADDA IYO SIDA LOO KALA LEEYAHAY.

- Raa'sumaalka Shirkadda waa \$245,000 (Labo Boqol Afartan iyo Shan kun oo dollar). Waxaana ku talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka shirkadda la kordhiyo ayada oo loo marayo in sheerer loo furo maalgashadayaasha Cusub.waxaana loo kala leeyahay sida soo socota.

NO	MAGACA	QIIMAHA
1	ABDIRAHMAN ADAM YAROW	\$130,000
2	ABDULKADIR ABDI MOHAMED	\$50,000
3	SAUDI MUSSA HUSSEN	\$15,000
4	MOHAMOUD JAMA MOHAMED	\$15,000
5	ABDIKANI MOALIN QORANE	\$25,000
6	ABDULLAHI MOHAMED ABDI	\$10,000
TOTALE		\$245,000




QODOBKA 8-AAD
QAAB-DHISMEEDKA SHIRKADDA



QODOBKA 9-AAD

GUDDOONKA SHIRKADA

Gudoomiyaha Ugu Horreeya Ee Shirkadda Waxaa Loo Magacaabay Mudane **ABDULKADIR ABDI MOHAMED** Oo Jagadaas Heynaya Inta Laga Bedelayo Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Shirkadda, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkada Rahana Gelin Karo Hantida Shirkada , Kana Saari Karo U Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Shirkada Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkada .Marka Uu Maqan Yahay Gudoomiyuhu Waxaa Shaqadiisa Sii Wadaya G/Kuxigeenka Shirkada Mudane **ABDIRAHMAN ADAM YAROW** Wuxuuna Qaban Doonaa Shaqadii Uu Gudoomiyuhu Qaban Lahaa Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkada Rahana Gelin Karo Hantida Shirkada , Kana Saari Karo U Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Shirkada Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkada sidookale XOGHEYTA SHIRKADA MUDANE; ABDULHI MOHAMED ABDI waxan u id manay in uu bangiyada dalka shirkada kuleedahay uu kasaari karo lacagaha kuna shubi karo saxiixikaro gegaga



QODOBKA 10-AAD
TIRADA DADKA AAS'AASAYAASHA AH

- Shirkaddu waa saamileey ay lahaanshaheeda leeyihiin Lix qof ee sare ku xusan.
- Maamulka sare ee shirkadda (board of directors), waxaa uu ka kooban yahay sadax xubnood oo milkiilayaasha ah, waana hay'adda ugu sareysa shirkadda, ayaga ayaana dooranaya xubnaha fulinta (executive officers) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.
- Xeer hoosaadka shirkadda ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya xeer hoosadyada aas'aasayaasha shirkadda. Waxa ayna xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka guud ee shirkadda.
- Qofkii lumiya xubinnimadiisa ama iibsada saamigiisa oo dhan waxaa ka reeban in uu sii isticmaalo magaca iyo astaanta shirkadda.

QODOBKA 11-AAD
BUUGGA HANTIDA SAAMILEYDA

Buugga hantida saamileyda waxaa ku cad qodobada soo socda:

- Inta uu la'eg yahay qiimaha saami kasta, inta saami uu leeyahay xubinkasta, magaciisa/magaceeda, xaddiga uu u dhiibay, taariikhda la dhiibay, lambarka boonada loo jaray, iyo dhamman warbixinadiisa oo tifatiran.
- Buuggaas waxaa keydinaya xoghayaha maamulka shirkadda.
- Waxaa saxiixaya maamulka shirkadda marka la dhameystiro caddeymaha saamiga iyo saamilaha.
- Saamilaha waxaa la siinayaa shahaado caddeyneysa saamigiisa, waxaana saxiixaya maamulka shirkadda.

QODOBKA 12-AAD
KORDHINTA IYO DHIMIDDA RA'SUMAALKA SHIRKADDA


- Maaliyadda shirkadda waa la kordhin kara, waana la dhimi karaa, haddii ay sidaas isku raacaan xubnaha shirkadda lana waafajiyo sharciga shirkadda.

QODOBKA 13-AAD
IIBINTA SAAMI

- Xubin Kasta Waxay Iibin Kartaa Saamigeeda Ay Ku Leedahay Shirkadda, Waxaana Mudnaanta La Wareegidda Koowaad Leh Xubnaha Shirkadda, Haddii Muddo lix Bil Ah La Waayo Xubin Ka Mid Ah Shirkadda Oo La Wareegta Saamiga La Iibinayo Saamiluhu Waxaa Uu Xaq U Leeyahay Inuu Ciddii Dalbaneysa Oo Aan Wadanka Danbi Ka Galin Ka Iibiyo Kadib Marka Ay Aqbalaan Qofkaas Gudiga Sare Ee Aas'aasayaasha.

QODOBKA 14-AAD
XUBINTII GEERIYOOTA

- Xubinta geeriyoota oo ka mid ah hantilayaasha shirkadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah, oo ay soo caddeyso maxkamad, kadib waxay soo magacaabanayaan wakiil haddii ay ogolaadaan in shirkadda ay kasiid mid ahaadaan, sidoo kale haddii ay dalbadaan in saamigooda la baxaan sanadka xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.



QODOBKA 15-AAD
ILAHA MAALGALINTA SHIRKADDA

- Ilaha maalgelinta Shirkadda waa maalgelinta saamileyda, iyo Deymaha waafaqsan Shareecada Islaamka.

QODOBKA 16-AAD
XISAABTA SHIRKADDA

- 1- Xisaab xirka shirkadda :- xisaabta shirkadda waxaa la xirayaa 31 MAY ee sanadkasta .
- 2- Zekada:- xisaab xirka ka dib, inta aan la qeybin faa'idada iyo khasaaraha waxaa laga bixinayaa zekada ku waajibtay hantida shirkadda waxaana masuulideeda leh maamulka shirkadda (executive director).
- 3- Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha:- qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha waxaa lagu jaangoynayaa saamiga ay xubin kasta ku leedahay hantida shirkadda.
- 4- Saamileyda Waxay Xaq u leeyihiin in ay qaataan Boqolkiiba Sodon 30% Faa'idadooda Sanadka Kowaad Sanadka Labaad iyo Sanadka Sadaxaad ee Marka Sanadka Xisaabta La Xiro 31 MAY.
- 5- Waxa laga jarayaa faida guud intaan laqey binin kahor 30% oo ah Kumeshan oo ay qaadana yaan howl wadeena shaqada.

QODOBKA 17-AAD
SHARUUDAHA KA MID NOQOSHADA

Qofka xubin rasmi ah ka noqon kara shirkadda:-

- Waa inuu ogolaansho ka haystaa shirkadda si uu uga mid noqdo saamileyda.
- Waa inuu dhiiba saamiga u xadidan shirkadda oo dhamaystiran.
- Waa in uu ogolaado, saxiixana xeerka shirkadda.
- Waa in uuna dalka ka galin fal dambiyeed ama ficilo wax u dhimaaya sumcada qofka.

QODOBKA 18-AAD
LUMINTA XUBINNIMADA

- Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda shirkadda.
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca shirkadda.
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.


QODOBKA 19- AAD
MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA.

Mudada Jiritaanka Shirkadda waa 50 Sano.

QODOBKA 20- AAD
BAABI'IDDA SHIRKADDA

Shirkadda waxay ku baabi'i kartaa marka ay timaado xaladaha hoos ku xusan:-

1. Haddii ay dhammaan xubnaha shirkadda isku raacaan baabi'inta shirkadda.
2. Haddii uu burbur ku yimaado dhammaan hantida shirkadda.
3. Haddii ay soo wajahdo hoos u dhac maaliyadeed ayna weydo kabidda saamileyda.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabi'inta shirkadda nuucaan ah.



QODOBKA 15-AAD
ILAHA MAALGALINTA SHIRKADDA

- Ilaha maalgelinta Shirkadda waa maalgelinta saamileyda, iyo Deymaha waafaqsan Shareecada Islaamka.

QODOBKA 16-AAD
XISAABTA SHIRKADDA

- 1- Xisaab xirka shirkadda :- xisaabta shirkadda waxaa la xirayaa 31 MAY ee sanadkasta .
- 2- Zekada:- xisaab xirka ka dib, inta aan la qeybin faa'idada iyo khasaaraha waxaa laga bixinayaa zekada ku waajibtay hantida shirkadda waxaana masuulideeda leh maamulka shirkadda (executive director).
- 3- Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha:- qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha waxaa lagu jaangoynayaa saamiga ay xubin kasta ku leedahay hantida shirkadda.
- 4- Saamileyda Waxay Xaq u leeyihiin in ay qaataan Boqolkiiba Sodon 30% Faa'idadooda Sanadka Kowaad Sanadka Labaad iyo Sanadka Sadaxaad ee Marka Sanadka Xisaabta La Xiro 31 MAY.
- 5- Waxa laga jarayaa faida guud intaan laqey binin kahor 30% oo ah Kumeshan oo ay qaadana yaan howl wadeena shaqada.

QODOBKA 17-AAD
SHARUUDAHA KA MID NOQOSHADA

Qofka xubin rasmi ah ka noqon kara shirkadda:-

- Waa inuu ogolaansho ka haystaa shirkadda si uu uga mid noqdo saamileyda.
- Waa inuu dhiiba saamiga u xadidan shirkadda oo dhamaystiran.
- Waa in uu ogolaado, saxiixana xeerka shirkadda.
- Waa in uuna dalka ka galin fal dambiyeed ama ficilo wax u dhimaaya sumcada qofka.

QODOBKA 18-AAD
LUMINTA XUBINNIMADA

- Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda shirkadda.
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca shirkadda.
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.


QODOBKA 19- AAD
MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA.

Mudada Jiritaanka Shirkadda waa 50 Sano.

QODOBKA 20- AAD
BAABI'IDDA SHIRKADDA

Shirkadda waxay ku baabi'i kartaa marka ay timaado xaladaha hoos ku xusan:-

1. Haddii ay dhammaan xubnaha shirkadda isku raacaan baabi'inta shirkadda.
2. Haddii uu burbur ku yimaado dhammaan hantida shirkadda.
3. Haddii ay soo wajahdo hoos u dhac maaliyadeed ayna weydo kabidda saamileyda.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabi'inta shirkadda nuucaan ah.



QODOBKA 21-AAD
HABKA UU KU DHACAYO BAABI'IDA SHIRKADDA

Baabi'idda shirkadda waxaa uu ku dhacayaa sida soo socota:-

1. Diyaarinta heerka maaliyadeed ee shirkadda.
2. Bixinta daymaha shirkadda lagu leeyahay.
3. Khasaaraha wuxuu ahaanaya hadba inta boqolkiiba uu saamigiisu la'eg yahay qofka.

QODOBKA 22-AAD
FADHIYADA SAAMILEYDA

Fadhiyada saamileyda waxay u dhacayaan sida soo socota:-

1. Kulamada caadiga ah ee saamileyda waxay dhacayaan sanadkiiba mar.
2. Kulamada aan caadiga ahayn, gudoomiyaha waxaa uu iskuugu yeeri karaa kulamo deg deg ah haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay isku raacaan xubnaha shirkadda.
- 6- Xubin walba waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiyo ogeysiis kulanka caadiga ah muddo bil ka hor

QODOBKA 23-AAD
CODKA SAAMILEEYDA

Codka saamileyda shirkadda waxaa loo raacayaa laguna qaadanayaa hal-dheeri haddii ay isla ekaadaan oo ay is garab dhacaan xubnaha shirkadda ee wax dooranaya waxaa loo raacayaa dhinaca guddoomiyuhu la jiro taas oo noqoneysa aqlabiyadda saxda ah.

QODOBKA 24-AAD
GUDOOMINTA SHIRARKA


- Shirarka kala duwan ee shirkadda, waxaa shir guddoominaya guddoomiyaha shirkadda, haddii uu maqan yahay guddoomiyaha, waxaa shirarka guddoominaya ku xigeenkiisa ama madaxa xisaabedka shirkada iyo cidii kale oo si qoraal ah ugu wakiisho guddoomiyaha marka lawaayo ku xigeenkiisa iyo madaxa xisaabedka shirkada.

QODOBKA 25-AAD
WAXYAABAHA AAN LAGU XUSIN XEERKAN

- Dhammaan waxaa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonaya sharciga islaamka qeybta mucaamalaadka iyo shirkadaha, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.
- F.g wixii shareecada islaamka ka hor imaanaya waa waxba kama jiraan.

QODOBKA 26-AAD
ISTICMAALIDDA MAGACA SHIRKADDA


- Magaca shirkadda ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida shirkadda sida: guryaha, dhulalka, gaadiidka, bank account, heshiisyadda, tiimbarayaasha iwm.



QODOBKA 27
HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
27 QODOB 1 COVER , 6 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

SAXIIXA MILKIILAYAASHA

ABDIRAHMAN ADAM YAROW

_____ 

ABDULKADIR ABDI MOHAMED

_____ 

SAUDI MUSSA HUSSEN

_____ 

MOHAMOUD JAMA MOHAMED

_____ 

ABDIKANI MOALIN QORANE

_____ 

ABDULLAHI MOHAMED ABDI

_____ 

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 110/T.P.N/22, Tr. 16/04/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana ay saxiixeen milkiilayaasha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magacyadaas inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyadan kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA


Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"



QODOBKA 27
HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
27 QODOB 1 COVER , 6 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

SAXIIXA MILKIILAYAASHA


ABDIRAHMAN ADAM YAROW

_____ 


ABDULKADIR ABDI MOHAMED

_____ 


SAUDI MUSSA HUSSEN

_____ 

MOHAMOUD JAMA MOHAMED

_____ 

ABDIKANI MOALIN QORANE

_____ 

ABDULLAHI MOHAMED ABDI

_____ 


(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 110/T.P.N/22, Tr. 16/04/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana ay saxiixeen milkiilayaasha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magacyadaas inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyadan kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"



_____ 





FURQ GAAR AH / OBSERVATIONS
 3

Saxiixaha baasaboorka leh / توقيع حامل الجواز / Signature of passport holder



Mohamed Jama Mohamed

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA **جمهورية الصومال** **SOMALI REPUBLIC**

BAASABOOR جواز سفر PASSPORT



Nooca / النوع / Type Dawladda / دولة / Country Code

P **SOM** **P00518208**

Magaca / الاسم / Name

MOHAMOUD JAMA MOHAMED

Magaca Hooyada / اسم الأم / Mother's Name

DAHABO ELMI ABDIRAHMAN

NID: 26405012714888

Jinsiyada / الجنسية / Nationality

SOMALI

Shaqada / المهنة / Occupation

BUSINESSMAN

Taariikhda Dhalashada / تاريخ الميلاد / Date of Birth

01 May 1964

Meesha laga Bixiyey / مكان الاصدار / Place of Issue

NAIROBI

Lab Dhesidig / الجنس / Gender

MALE

Meesha Dhalashada / مكان الميلاد / Place of Birth

MOGADISHU

Taariikhda la Bixiyey / تاريخ الاصدار / Date of Issue

09 Feb 2016

Xafiiska laga Bixiyey / جهة الاصدار / Issuing Authority

SOMALI GOVERNMENT

Taariikhda uu Dhacayo / تاريخ الانتهاء / Date of Expiry

08 Feb 2021

Saxiixaha Qofka / توقيع حامل الجواز / Holder's Signature

Mohamed Jama Mohamed






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 27/04/2022

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/raxmaan Aadan Yarow** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye . Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 110/T.P.N/22, Tr. 17/04/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	
Taariikhda Caddeynta	17/04/2022

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **C/raxmaan Aadan Yarow**, Leh Tel No. **0615561292**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha TAYO** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay ..



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/raxmaan Aadan Yarow

(Handwritten signature of Maxamed Cabdi Cali)

(Handwritten signature of C/raxmaan Aadan Yarow)